Kaaliyahaaga ee sameynta ganacsiga

The Law Society

Helidda talobixin

Qabanqaabinta ganacsi waa arrin aad u xiiso badan. Illaase haddii aadan helin talobixinta habboon wuxuu ganacsiga kugu noqon karaa miino dhulka ku aasan, siiba marka laga eego dhanka sharciga. Sida badan, dadka waxay codsadaan talobixinta looyarka marka ay arrimi fari ha haaddo. Illaase haddii goortaasi la heli karo xal, way ka kharash badan tahay qaadidda tallaabo looga hortagayo dhibaatada marka hore.

Sida dhabta, ka hortegidda ayaa ka muhiimsan badbaadada. Haddii aad heshid talobixin sharciyeed marka hore ee aad ganacsiga billaabeysid waxaad ka badbaadi doontaa dhibaatooyinka gadaal ka soo bixi doono. Looyarka wuxuu ku tusi doonaa dhibaatooyinka imaan karo, isla markaasina wuxuu kuu fafaahin doonaa sida habboon ee looga badbaadi karo – taasi oo kaa ilaalin doonto kharashyo dambe oo dheeraad ah ee aad geli lahayd.

Doorashada iyo adeegsiga looyarka

Aad bay muhiim u tahay in aad qabsatid looyar aqoon iyo khibrad u leh hawlaha aad u baahan tahay. Looyarrada Mashruuca Ganacsigaada (Lawyers For Your Business scheme) waxaa loogu talagalay in ganacsatada yar yar ay siiyaan talobixin sharciyeed ee ku saabsan habka hirgelinta ganacsiyada yar yar. Waxaa kaloo laga heli karaa latalin lacag la'aan ah. Haddaad u baahan tahay liiska xubnayaasha Looyarrada Mashruuca Ganacsigaada waxaad kala xiriirtaa telefoonka 020 7405 9075 ama waxaad eegtaa cinwaanka intarneetka ee www.lawsociety.org.uk/lfyb.

Ama waxaad waxaad ka daalacan kartaa cinwaanka intarneetka ee www.lawsociety.org.uk/findasolicitor ama waxaad soo wacdaa telefoonka 0870 606 2555.

Liiska eegitaanka ee waxyaabaha sharciga

Looyarrada waxaa laga heli karaa dhammaan dhibaatooyinka ku imaan kara ganacsiyada cusub. Waxaad kaloo ka heli kartaa talobixin buuxda ee ku saabsan habka xallinta arimo badan oo kala duwan. Si ay kuu siiyaan talobixinta aad u baahan tahay waxay ku weydiin doonaan su'aallo badan. Su'aallahaasi waxay koobmi doonaan arrimaha soo socda.

Qaabka shirkadda

Aad bay muhiim u taay qaabka shirkadda ganacsiga ee aad ku billaabeysid. Tusaale, ma magaacada ama magac shirkad kale ayaad ku billaabi doontaa? Haddii aad shiraako kula tahay dad kale, waa in aad heshaa faa'ido u dhiganto shaqada aad qabatid, sidaasi awgeedna aad bay muhiim u tahay in la sameeyo qoraalka heshiiska ee dadka shiraakada ganacsiga ku ah ama aad ganacsiga wada leedihiin. Looyarkaada ayaa kaala talin doono fursadahaiyo talabixinta kala duwan ee waxybaaha ku habboon ganacsigaada – iskaashiga, shirkad buuxda ama iskaashiga mas'uuliyadda shirkadda. Looyarkaaga wuxuu kaloo kuu diyaarin karaa fursado kala aad kala dooran kartid.

Dhismaha goobta ganacsiga

Waa in aad si wanaagsan u fahansan tahay shuruudaha la xiriira guriga aad ganacsiga ku sameyn doontid. Miyuu qofka guriga iska leh ku dari karaa lacagta ijaarka? Haddii uu ku dari karaa, meeqaa buu ku dari karaa? Miyaad la kulmi doontaa kharashka iyo ijaarka guriga oo mar kasta kor u kici doono? Miyaad u baahan doontaa qorshaha oggolaanshaha haddii aad beddelaad sameyn doontid? Miyey jiraan waxyaabo ii diidayo, haddii aan damacsanahay in ganacsiga aan ku sameyo gurigeyga? Looyarkaaga ayaa kaa caawin doonaa jawaabaha su'aalaha kor ku xusan.

Dhaqaalaha

Waxaa kaloo suurtowda in aad u baahan tahay akhbaarta noocyada dhaqaale ee aad heli kartid iyo shuruudaha ku xiran. Deynta moorgeejka miyaad ku qaadataa guriga qoyska? Miyey cidda ku amaahineyso lacagta kugu xireysaa shuruudo aan maangal ahayn? Suurtagal miyey tahay in bangigaada uu kuu dhaamo cidda kale ee ku amaahineyso dhaqaalaha. Looyarkaaga ayaa kuu sharxi doonaa dhammaan arrimahani isla markaana kuula hadli doona cidda aad dhaqaalaha ka amaahaneysid.

Canshuurta

Looyarkaaga ayaa ku siin doonaa sida aad u dhimi kartid canshuurta iyo wakhtiga habbon ee billaabidda sanadka canshuuraha.

Caymiska

Waxaa suurtowda in ganacsigaada uu kula kualnsiiyo waxyaabo khatar kuu lahan karo ee ku saabsan guriga aad ijaaratay, shaqaalaha, hantida iyo martida. Maxaa dhici doonaa haddii badeecadaada ama shaqadaada uu qof dhaawac ka soo gaaro? Maxaa dhici doonaa haddii qof kuu shaqeynayo uu shaqada ku dhaawacmo? Maxaa dhici doonaa ahddii aad mas'uul ka tahay qof si xun u isticmaala intarneetka? Looyarkaaga ayaa ku siin doonaa talobixin madaxbannaan ee ku saabsan waxyaabaha halista ka imaan karto ee aad caymis ka geli kartid.

Lacagta caddaanka ee aad qabatid

Lacagta caddaanka ee ganacsiga waa ilaha dhaqaale ee uu ganacsi kasta ku dhaqaaqo. Looyarkaaga ayaa kuu sheegi doonaa hababka aad isaga ilaalin kartid deymaha aan habbooneyn iyo waxyaabaha ku habboon ganacsigaada. Waxaad kaloo looyarka ka heli kartaa talbixinta habka aad deymaha kaa maqan usoo uruurin kartid.

Badeecada iyo adeegyada

Waa in aad ogsoon tahay waajibaaka sharciyeed ee ku saaran goorta aad iibineysid ama gadaneysid badeeco. Maxay tahay shuruudaha ku xiran kunturaadda ee uu sharciga ku farayo? Maxay tahay mas'uuliyadda kaa saaran badeecada aad iibineysid? Maxaad ku qori kartaa xayeysiinta iyo fidinta badeecadaada? Looyarka ayaa dhammaan arrimahani si faafaahsan kaaga warami doonaa, haddii loo baahdana wuxuu kuu gudbin doonaa qof takhsuus ku ah.

Badbaadinta fikradahaaga

Looyarkaaga ayaa kaa caawin doonaa sidii aad u badbaadin lahayd naqshaddaada taasi oo aad kaga badbaadin kartid tartamayaasha kale ee doponaya in ay kaa xadaan fikraddaada, haddii ay noqon lahayd isticmaalidda magaca shirkaddaada iyo astaantaada ama sheeyada aad ibbisid.

Wakiilka iibinta badeecada

Iibsashada ganacsi hore u jirey waa fursad aan la huri karin, illaase ma ogsoon tahay mas'uuliyadda sharudd u ahayd ama ma wada fahan tahay dhammaann akhbaarta heshiiska farta yar yar qoran (small print) ee heshiiska ganacsiga? Sida badan, dadku waxay ku khatalmaan badeeco qaali ah oo aan la iibsan isla markaana aan wax kaalmo ah laga helin cidda badeecada kuu keento (franchiser). Maxaad sameyn kartaa haddii badeecada lagaaga iibsan waayo sidii aad ku khiyaaseysay? Miyaa laguu soo celin doonaa lacagtaada? Looyarkaaga ayaa kuu sheegi doonaa dhamaan dhibaatooyinka la xiriira wakiilka iibinta badeecada.

Shatiga

Miyaad u baahan tahay shatiga ganacsiga? Looyarkaaga ayaa kuu sheegi doonaa haddii aad mid u baahan tahay isla markaana kaa caawin doona habka codsiga.

Shaqada

Sharciyada shaqada waa kuwo adag oo mar kasta beddelmayo. Badan khilaafyada ka dhashi goobaha shaqada waxay ka dhashaan adeegyada kunturaadda oo si xun loo qoray ama nidaam aan waafaqsaneyn sharciga. Looyarkaaga ayaa kunturaaddaada ka eegi doona dhanka caafimaadka iyo arrimaha kale ee keeni karo khilaafyo.

Kaaliyahaaga ee sameynta ganacsiga

The Law Society

Khilaafka iyo dhibaatada

Waxaa habboon goor kasta oo arrin ganacsi la eegayo in qorsaha lagu daro wax kasta oo suurtagal ah. Sidee bay xaaladdu noqon doontaa haddii aad isqilaaftaan xaaskaaga ama cid kaloo aad ganacsiga shiraako ku ahaydeen? Miyaa si khasab ah lagaaga saari karaa? Si u xaqiijin kartaa in si siman hawsha iyo mas'uuliyadda loo wadaago? Muxuu ku dambeyn doonaa ganacsigaada haddii aad xaunuunsatid ama aad dhimatid? Miyaa xaaskaaga ama gurigaada heli doonaa badbaado? Looyarkaaga ayaa dhammaan arrimahani kaala hadli doona.

Kharashka

Haddii looyarka aad ka heshay barnaamijka Looyarka Ganacsigaada (Lawyers For Your Business), intarfiyuugaada ugu horreeyo waa lacag la'aan. Markaasi kadib ayuu looyarkaada kuu xisaabi doonaa saacadaha talobixinta dheeraadka ah kuna qaadi doona qiimo go'an.

Kharashka looyarrada wuu kala duwan yahay. Qiimaha guud wuxuu ku xiran yahay:

- Xaaladdaada gaar ahaaneed;
- Khibradda iyo aqoonta looyarkaaga; iyo
- Nooca talobixinta aad u baahan tahay.

Sababtani awgeed, waa in aad codsataa qiyaasta lacagta ku bixi doonto inta aadan go'aansan.

Akhbaar dheeraad ah

Looyarrada Ganacsigaada waxay soo saareen qoraallo taxane ah oo kaa caawin doono sida aad u fahmi lahayd waxyaabaha sharciga ee la xiriira ganacsiga.

Qoraaladahaasi ee kaaliyaha waxay ka kooban yihiin:

- Sarciga shaqooyinka;
- Guryaha ganacsiga;
- Kunturaadda macaamiisha iyo cidda badeecada ganacsiga kuu keeni doonto;
- Arrimaha caafimaadka iyo nabadgelyada;
- Kor u qaadidda sicirka; iyo;
- Qaabeynta ganacsigaada.

Haddaad u baahan tahay koobbiyada kaaliyaha waxaad ka soo xiriirtaa:

- soo wac nambarka telefoonka 020 7405 9075;
- ka dalaaco cinwaanka intarneetka ee www.lawsociety.org.uk/lfyb;
- qoraal usoo dir:

  Lawyers For Your Business

  The Law Society

  113 Chancery Lane

  London WC2A 1PL

Waxaad heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran far waweyn, farta baraylka ee indhooleyaasha, iyadoo ku duuban cajaladda maqalka ama CD. Haddaad u baahan tahay mid ka mid ah kuwani, fadlan waxaad nagula soo xiriirtaa iimeylka accessibility@lawsociety.org.uk ama kala xoo xiriir telefoonka 0870 606 2555.

Waxaad kalood heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran luqado kala duwan. Waxaad ka daalacan kartaa boggeena intarneetka ee www.lawsociety.org.uk.

Lexcel

Look for Lexcel - the mark of excellence

Inkastoo aanu ku dadaalnay tebinta akhbaar hufan, haddana ogsoonow, goor kasta qaynuunka iyo sharciga isbeddel ayaa lagu sameeyaa taasi oo qof kasta si gaar ah u saameyso. Xaashidani kuma saabsano akhbaar ama talobixinta shaqsiyaad gaar ah, sidaasi awgeedna mas'uul kama aanu nihin wixii dhibaato ah ee ka yimaaddo akhbaarta xaashidani.

Designed by dmlmarketing.co.uk Version 2, 2007 Your guide to setting up business - Somali